

Xidhashada Suunka Misigta Dhinaca u Celiya

1. Suunka misigta dhinaca u celiya ayaa loo xidhan karaa si toos ah maqaarka dushiisa (xafaayadda dusheeda) ama dharka jidhka qaabkiisa leh ee le'eg korkooda. Hubso in dharka uu yahay mid jilicsan oo aan laalaab lahayn.
2. Suunka waa in la xidhaa iyada oo uu bukaanka dhabar dhabar u jiifo. Bukaanka ayaa suunka lagu dul seexiyaa ama cagahiisa ayaa kor loo qaadaa si suunka loo hoos geliyo.
3. Qaybaha bowdada ee suunka waa in marka hore si fiican loo xidhaa, iyada oo la gelinayo isbuunyada ku duuban xagga hore ee bowdooyinka dhabarka dambe ee suunka si aysan u jirin farqi bannaan ka dibne waxaa si fiican loo xidhaa suumanka jararacda. Ka dib suunka wareega dhexda waa in si fiican loo xidhaa.

Daryeelka Maqaarka ee Suunka Misigta Dhinaca u Celiya

Suunka waxaa laga yaabaa in lagu xidho si toos ah maqaarka dushiisa (xafaayadda dusheeda) ama dharka jidhka qaabkiisa leh ee le'eg korkooda. Si adag u jiid wixii dhar ah si aanu u jirin laalaab suunka hoostiisa. Haddii bukaanku dhididayo, beddel dharka suunka hoostiisa marar badan. Qoyaanku wuxuu sababi karaa maqaarka oo dildilaaca, caabuuq iyo urka jidhka.

Waa inaad si joogto ah u hubisaa maqaarka bukaanka oo aad ka fiirisaa calaamado casaan ah ama guduudan. Haddii calaamad casaan ama gaduud ah ay ka sii muuqato maqaarka bukaanka in ka badan 30 daqiiqo ka dib marka laga furo suunka, waxaa laga yaabaa inuu jiro cadaadis aad u badan waana inaad la xiriirtaa khabiirka qalabka xubno xidhka (Orthotist).

Iska ilaali inaad isticmaasho waxyaabaha dufanka leh sida looshanka, kareemka iyo saliidaha maqaarka dushiisa oo suunka ka hooseeya. walxahani waxay jilciyaan maqaarka waxayna horseedi karaan hunbudh ama xanfah kale oo maqaarka ah.

Tilmaamaha Isticmaalka iyo Xidhashada

Suunka Misigta Dhinaca U Celiya

Hip Abduction Brace Applications and Use Guidelines - Somali

Haddii nabar furan ama hunbudh uu samaysmo, ogeysii khabiirkaada qalabka xubno xidhka (Orthotist) sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah.

Nadiifinta Suunka Misigta Dhinaca u Celiya

U nadiifi suunka hadba sida loogu baahdo adigoo isticmaalaya saabuun khaafiif ah iyo biyo diirran, tirtiraha ilmaha, ama aalkolada wax lagu nadiifiyo. Hubso in qaybta jirka ee bukaanka iyo suunkuba ay qalalan yihiin ka hor intaadan xirin suunka.

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Looguma talagalin in lagu beddelo talooyinka takhaatiirtaada daryeelka caafimaadka. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, la hadal dhakhtarkaada ama kuwa kale ee ka tirsan kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaanka Gillette oo qabo su'aalo deg-deg ah ama walaac, fadlan la xiriiir Khadka Kalkaalisada [651-229-3890](tel:651-229-3890).